# Xeerarka Guriga

**Ee deegaanada ay qaxootiga siiso degmada Oder-Spree, dadka mar danbe laceshay, iyo iyo soogalootiyada shisheeye ee kale iyo qaraabadooda halkii § 11 para ba. 1 jumlad 2 Sharciga Diiwaangalinta Qaran ee Brandenburg**

## 1. Deegaanada wadaaga ah iyo dadka dagan iyo kuwa soobooqanaayo

(1) Deegaanada wadaaga ah waxaa lagu aasaasay ayadoo laraacaayo Sharciga Diiwaangalinta Qaran ee Gobalka Brandenburg waxaana fuliya degmada Oder-Spree ee guriyaynta kumeelgaarka ah ee qaxootiyada, dadka gadaal lagasoo celiyay, iyo soogalootiga kale ee shisheeye iyo qaraabadooda.

(2) Daganuhu waa qofka ladajiyay guriga kamidka ah deegaanka wadaaga ah.

(3) Booqduhu waa qofka raba inuu soogalo deegaanka wadaaga ah asagoon meeshaas guri laga siin.

## 2. Maamulka ee deegaanada wadaaga ah

(1) Qarashaadka laga sameeyo ayadoo lagu shaqaynaayo deegaanada wadaaga ah waxaa laga bixiyaa ayadoo ladhisaayo maamulka shaqaalaha (mustaqbalka: maamulka).

(2) Maamulku wuxuu dhaqangaliyaa xeerarka guriga wuxuun dajiyaa  shuruucda muuhiimka ah ee ay ubaahdaan. Dhaqangalinta ee xeerarka guriga waxay dagmadu kuwareejin kartaa deeqbixiyaasha madaxa banaan ee uu qeexay heshiiska xanaanada bulshada ee qaxootiga, dadka lasoo celiyay, iyo soogalootiyada kale ee shisheeyaha ah iyo qaraabadooda, si lamaidana adeega amaanka ee uu shaqaalaysiiyay hawlwadeenka deegaamaynta labadaba.

(3) Daganayaasha iyo booqdayaasha waxaa waajib ku ah inay raacaan shuruucda ee guryahaan ayna si degdega uraacaan tilmaamaha maamulka.

## 3. Deegaanada iyo meelaha lagu raaxaysto, isticmaalka tamarta

(1) Maamulku wuxuu siiyaa qofkasta oo cusub goob gaar ah oo kamida guryaha deegaanka, wuxuuna abaabulikaraa dib udajino gudaha deegaanada guud guryaha kuyaalo ah.

(2) Marka lasoo galaayo, dagane kasta ama qoys wuxuu helayaa, si hormaris ah hadii qorshe noocaas ah uu jiro, fure guri kaasoo ah mulkiyada degmada Oder-Spree waana sidaa awgeed  lasoo celyaa marka laguuraayo kaasoo lagaa magaayo haduu dhumo.

(3) Majirto damaanad ah in shaqsiyaadku helayaan boos ama qol kaligiis ah.

(4) Qolalka deegaanka iyo alaabta, iyo sidoo kale waxyaalaha qofku kuraaxaysto iyo alaabta jikada, waa in laga taxadaraa. Qalabka korontada kushaqeeya iyo alaabta guriga lagama saarikaro guriga ilaa ay maamulku sameeyaan. Fasax ayuu ubaahanyahay si shaqsigu uu ukeeno alaabtiisa iyo qalabkiisa korontada. Qofkasta oo dagan asagaa magaaya waxyeelooyinka uu sababo. Qolalka waa in si wanaagsan loo nadiifiyaa si looga hortago in cayayaan ku abuurmo.

(5) Hadii qof daganaa uu alaab uga tago guryaha kadib markuu guuray, alaabtaas waxaa laxaraynaayaa ugu badnaan 3 bilood. Marka waqtigaanu dhamaado, alaabta waa laburburinayaa haday umuuqdaan kuwo aan qiima lahayn. Alaabta qiimaha leh waxaa lagu qiimaynayaa ama lagu xaraashayaa sida sharcigu qabo. Dharka, kabaha, doobiga, iwm. si degdeg ah ayaa loo burburinayaa hadii hadii loogu baahdo sababo nadaafadeed awgeed.

(6) Korontada, biyaha, iyo qalabka wax kululeeya waa in loo adeegsadaa si tashiil ah.

### 4. Galtaanka deegaanada

(1) Dadka dagan waa inay ufasaxaan maamulka shaqaalaha si ay ugalaan deegaanada waqtigay rabaan ayadoo latixgalinaayo codsiga si lamida waqtiyada la isku raacay si wada jir ah.

(2) Maamulka shaqaalaha ayaa loo ogolyahay inay galaan deegaanada waqti kasta si

- a) degdeg qof loosiiyo guri,
- b) halis looga hortago,
- c) labaaro joogitaanka shaqsiyaadka jooga ee aan fasaxa qabin iyo in lacayrsho.

(3) hadii halis jirto ee isticmaalka awood ama hadii ay jiraan waxyaalo muujinaaya in lagalay danbiyo kadhan ah sharciga, maamulku wuxuu laxariiri karaa booliiska waqti kasta si looga hortago fal danbiyeed.

### 5. Aan rabsho lahayn

(1) Ladhaqanka wanaagsan ee shaqaalaha, iyo cayda iyo xadgudubyada kale ee kadhanka ah ladhaqanka haweenka iyo shaqaalaha, lamana aqbali karo.

(2) Xushmad buuxda ayaa laga doonayaa dhamaan dadka dagan si loofuliyo maslaxada wada noolaanshaha.

(3) Isticmaalka qasabka gacan kahadalka ama maskaxeedka ah lama falgali karto mabda'aan waxayna sababi kartaa in lagaa mamnuuco dhismayaasha.

### 6. Waajibka qofka dagan ee ah inuu gacan kagaysto shaqooyinka nadiifinta iyo hawlaha guriga

(1) Dhamaan dadka dagan waa inay unadiifiyaan deegaanadooda sida larabo, laakiin ugu yaraan halmar asbuucii. Dadka dagan waxaa lagu amri karaa inay kaqaybqaataan nadaafada meelaha lawadaago sida jikooyinka, luuqyada, jaranjarada, xamaamooyinka, iwm.

(2) Qolalka doobiga, xiriirada tuubada, meelaha biyaha maraan, meelaha qalalan, iwm., waa in loonadiifiyaa sida loo baahanyahay ayna nadiifiyaan dadka dagan. Xirmooyinka waa in degdeg ah loo saaraa ayna, hadii aan si shaqsi ah loo qaban karin, lagu wargaliyaa maamulka.

(3) Wasaqda waa in lagu ridaa kunteenarada wasaqda loogu talagalay ee lama galinkaro musqulaha, meelaha biyaha maraan, iyo ilimada. Meelaha ladhigo konteenarada qashinka waa in lanadiifiyaa.

(4) Kadiifadaha, sijaayadaha, kabaha orodka, dharka, iwm., waxaa lagu jafikaraa ama lagu ruxi karaa dayrka aagiisa

(5) Doobiga waxaa lagu qalajinkaraa meelaha loogu talagalay. Dharka oo lagu waro lana suro daaqadaha, iyo in lasaaro qalajiyaasha daaqadaha, lama ogola.

(6) Meelaha baakinka iyo taraafikada waxaa loo ogolyahay sabo badqabka dabka ah, waana in alaabta laga saaraa sida uu maamulku uu dalbado.

(7) Dhamaan dadka dagan waxaa waajib ku ah inay raacaan awaamiirta maamulka si loo xaqiijiyo maamulid fudu oo guryaha ah.

(8) Shuruucda badqabka dabka ee hantida lasaaray waa in markasta laraacaa.

### 7. Waajibka saaran qofka degan si uu u ogaado

(1) Maamulka waa in si degdeg ah loogu wargaliyaa:

- a) dabka, halista dabka
- b) cudurada jeermiska iyo kuwa halista ah
- c) cayayaanka
- d) cayayaanka
- e) falal danbiyeedyada lagu galay deegaanada lawadaagay, gaar ahaana dhaawaca xun, xadgudubka galmada, kufsiga, xatooyada, waxyeelo danbiyeedka, lahaanshaha iyo isticmaalka muqaadaraadka.
- f) waxyeelada dhismayaasha dhexdooda, gaar ahaana qalabka wax kululeeya, nadiifinta, iyo rakibaada qalabka korontada iyo alaabta guriga.

(2) Maamulka waa in sidoo kale degdeg loogu wargaliyaa:

- a) isbadal kasta oo kuyimaada xaalada soogalootinimo
- b) isbadal kasta oo dhalasho, guur, dhimasho, magac, iwm.

## 8. Falalka lamamnuucay

(1) falalka soosocda waa lamamnuucay:

a) qaadista, kaydinta, iyo isticmaalka xaabada, xaabada sharaxaada iyo boonbalada.
b) hab dhaqan kasta kaasoo dhibaateeya ama waxyeelayn kara ama amar ama amaanka ee deegaanada
c) baakimada iyo alaabta kaydinta - baaskiilada, riixyada, sanduuqyada, alaabta guriga, iwm. - ee luuqyada iyo meelaha lamaro.
d) baakinka mootooyinka iyo bajaajyada ee jaranjarooyinka, luuqyada, il xirada, iyo qolalka.
e) rabsho kicinta saacadaha habaynkii lahurdo (22:00 - 6:00) iyo qaylada xad dhaafka ah xiliga maalintii (kadib 6:00)
f) sigaarka oo lagu cabo qolalka jiifka ama kuwa laseexdo iyo si lamida qolalka nadaafada, jikada, iyo gidaarada.
g) kushaqaynta dab holcaaya ama in lakaydsho alaabta holci og ama sunta ah iyo kuwa dareeraha ah
h) isbadalo iskood ah oo lagu sameeyo qaab ahaan iyo farsamo ahaanba, gaar ahaan qalabka wax kululeeya, nadaafada, iyo rakibaadyada korontada iyo rakibada anteenooyinka iyo saxamada satalaydyada
i) kushaqaynta aaladaha koronto ah kuwaasoo aan waafaqsanayn xadadka amaanka ee jira.
j) isticmaalka xad dhaafka ah ee korontada, biyaha, iyo qalabka wax kululeeya
k) bixnta badeecooyin iyo adeegyo noockastay noqdaanba iyo qaabkasta oo xayiisiin ganacsi ah,
l) abuurida iyo maamulida ganacsi, iibin, ama hawlo kale
m) kudiyaarinta cuntada qolalka fadhiga ama jiifka
n) ilaalinta iyo isticmaalka xad dhaafka ah ee alkolada, iyo isticmaalka waxzyaalaha maanka dooriya
o) haysashada xoolaha
p) hawl kasta oo diimeed ama urur siyaasadeed ah
q) qariba ganbaleelka dabka ayadoo si ula kac ah loo jabiyo galaaska difaaca ah ee ganbaleelka dabka lana riixo batoonka ganbaleelka
r) adeegsiga qalabka korontada, gaar ahaana mashiinada wax dhaqa, daboolada shoolada, iwm., ayadoon lala socon.

(2) maamulku wuxuu soo rogi karaa mamnuucyo dheeraad ah waqti kasta ayadoo loofiirinaayo maslaxada amaanka iyo amarka, iyo si loo ilaalsho nabadgalyada ee deegaanada.

## 9. Booqdayaasha, martida

(1) Booqde kaasoo yaqaana qofka degan si shaqsi ah, ama dhalasho lawadaaga ama guur, waxay soo booqankaraan deegaanada inta udhaxaysa 8:00 iyo 22:00 ksdib markuu maamulku diiwaangasho. Boqdaha wuxuu maamulku kadoonayaa inay tusaan aqoonsigooda markasta oo laga codsado. Hadii booqduhu uusan awoodin inuu tuso aqoonsigiisa, maamulku waxay codsankaraan inay dhismaha si degdg ah uga tagaan.
(2) Booqdayaasha aan aqoon qofka dagan si shaqsi ah, aana lalahayn xiriir wada dhalasho ama guur, waxay gali karaan deegaanada ayna booqankaraan hadii maamulku si guud ufasaxo. Cidna masheegankarto ogolaansho. Ogolaanshahaan wuxuu dhacayaa 22:00 ee maalinta booqashada. Boqdayaashaan wuxuu maamulku kadoonayaa inay tusaan aqoonsigooda markasta oo laga codsado.
(3) Lamaanayaasha iyo caruuurta ee dagan waxay helikaraan fasax xiliga habaynkii ay soojeedaan ugu badnaan 7 maalmood ee uu ogolaaday maamulka oona loofiirinaayo hadba xaalada jirta, iyo firaaqada lahelikaro. Booqdayaashu waa inay bixiyaan qarashka ogolaanshaha noocaan ah.
(4) Maamulku wuu kanoqonkaraa fasaxa hawayska iyo booqdaha xili kasta.

## 10. Maqnaanshaha kumeelgaarka ah

(1) Dadka dagan ee doonaaya inay kamaqnaadaan deegaanada wax kabadan 24 saacadood waa inay arintaan kuwargaliyaan maamulka markay tahay 12:00 ee maalinta hore, ayna sheegaan ciwaanka laga helikaro.
(2) Ayadoo laraacaayo qorshaha qolka ee deegaanada wadaaga ah, maqnaanshaha noocaas ah waxaa lo ogolyahay ugu badnaan hal asbuuc. Maamulku wuxuu bixin karaa maqnaansho laba asbuuc ah xaaladaha gaarka ah markay jiraan.
(3) Soonoqoshada waa in si degdeg ah loogusoo wargaliyaa maamulka.

## 11. Dhaamaadka deegaan siinta

Markuu waqtiga joogitaankoodu dhamaado, dadka daganaa waa inay xaaqaan oo nadiifiyaan booskooda, soo celiyaan qalaabta raaxada iyo qalabka jikada, si lamidana soo ceshaan furayaasha, maamulkana uceshaan ayagoo waafaqsan shuruudii iyo nambarkii ay kuheleen, ayna katagaan deegaanada wadaaga ah.

## 12. Kutumashada shuruucda guriga

Kuxad gudubka xeerarka guriga waxaa laguugu ciqaabi karaan kuxad gudub ahaan aad kuxad gudubtay sharciga ayadoo lagaa qaadaayo ganaax dhan shan ilaa kun lacagta yuurada (euros) ah oo ah markiiba § 11 sida uu qabo sharciyada degmada Oder-Spree ee quseeya isticmaalka deegaanada wadaaga ah, meelaha ladanyahay, iyo guryaha kumeel gaarka ah ee ee deegaamaynta qaxootiga ee aan joogtada ahayn, dadka lasooceliyay, iyo soogalootiga kale ee shisheeye iyo qaraabadooda (ka sharciyada deeganka ahaan) laga bilaabo 06.12.2016.

## 13. Dhaqangalin

(1) Shuruucdaan guriga waxay dhaqangalaysaa 01.04.2017.
(2) Xeerarkii guriga ee hore masiijirayaan marka lagaaro taariikhda kor kuxusan.

Magaca qoyska: ______________________________

Magaca koobaad: ______________________________

Magaca dhalashada: ______________________________
(hadii lahelikaro)

Taariikhda dhalashada: ______________________________

Ogaysiis:

Waxaan halkaan kaxaqiijinayaa inaan aqriyay aqbalayna shuruucda guriga ee deegaanada wadaaga ah ee qaxootiga, dadka lasooceliyay, iyo soogalootiyada kale ee shisheeye iyo qaraabadooda ee kusugan degmada Oder-Spree halkii § 11 para ba. 1 jumlad 2 Sharciga Diiwaangalinta Qaran ee Brandenburg laga bilaabo 01.04.2017.

Waan fahmay shuruudaha halkaas kuxusan:

……………………………………………………………………………………………………………
(Goobta, taariikhda, saxiixa)